# Xafiiska Fudeydinta Luqadda
## Hanaanka Cabashada ee Fudeydinta Luqadda

Dukumentigani waxa uu faahfaahinayaa tallaabooyinka uu qaadi karo qofka cabanayaa si uu u soo sheego in maxkamaddu deegaanku ku guulaydaraysatay inay siiso tarjumaan ama caawimo kale oo luqadeed marka ay jiraan hawlaha maxkamadda la xiriira. Qofka cabanaya ayaa xareyn kara cabasho la xiriirta arrimaha fudeydinta luqadda ee la xiriira la macaamilka Maxkamadda Cadaaladda ee Kentucky ee qofka cabanaya. Fadlan la soco in xareynta cabashada luqaddu aysan ka dhignayn racfaan ka qaadashada xukun ama amar. Marka uu codsado qofka cabanayaa, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa bixin doona adeegyo luqadeed oo habboon, kuwaas oo ay ku jiraan helista turjumaan, si uu uga caawiyo qofka cabanaya dhamaystirka hanaanka cabashada.

**1. Bilaabida Cabashada.** Qofku waxa uu ku gudbin karaa dacwad isagoo qaadaya mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:

• Cabashada waxaa lagu soo xareyn karaa oo lagu soo gudbin karaa onlayn iyadoo la buuxinayo **foomka cabashada ee onlaynka ah**.

• Cabashada waxaa lagu soo gudbin karaa taleefanka iyadoo la wacayo 502-573-2350 oo laga codsanayo in lagu xidho Xafiiska Fudeydinta Luqadda. Wakiil ka socda Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa si gaar ah ula hadli doona qofka cabanaya oo ka qori doona macluumaadka lagama maarmaanka u ah bilaabida hanaanka cabashada.

• Cabashada waxaa lagu soo gudbin karaa qoraal ahaan iyadoo warqad cabasho loo dirayo ciwaanka soo socda:

Administrative Office of the Courts
Attention: Office of Language Access
1001 Vandalay Drive
Frankfort, KY 40601

**2. Diiwaangelinta.** Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa dib-u-eegis ku sameyn doona cabashada oo heli doona dhammaan macluumaadka la xidhiidha cabashada. Haddii, diiwaangelinta hore kadib, la go'aamiyo in cabashadu tahay macquul, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa u qoondeyn doona cabashada lambarka diiwaangelinta si hadhow loogu raad raaco iyo si loo fayl gareeyo. Si kastaba ha ahaatee, haddii cabashada la go'aamiyo inay tahay mid aan macquul ahayn diiwaangelinta hore kadib, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa meesha ka saari doona cabashada oo ogeysiin doona qofka cabanaya in aan tallaabo dheeraad ah la qaadi doonin.

**3. Qiritaanka Helitaanka Cabashada.** Marka laga reebo marka uu wakhtiga cidhiidhi yahay, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa ugu qiri doona qofka cabanaya inay cabashada heleen muddo 10 maalmood oo shaqo gudahood ah. Xafiiska Fudeydinta Luqaddu waxa kale oo uu ka codsan karaa macluumaad iyo/ama caddeymo dheeraad ah qofka cabanaya marka uu helo cabashada si markaas si buuxda loogu baadho cabashada. Haddii uu wakhtiga cabashadu cidhiidhi yahay (tusaale, cabasho ku saabsan dhageysi soo socda oo la qorsheeyay ka hor dhammaadka 10ka maalmood ee shaqo), Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa ka shaqeyn doona sidii loo dedejin lahaa qiritaanka helitaanka iyo baadhista xigta ee cabashada iyada oo lagu dedaalayo in wixii dhibaato ah ee jira loo xalliyo si aan dib dhicin.

**4. Ogeysiinta Maxkamadda Deegaanka.** Marka la helo dhammaan macluumaadka iyo/ama caddeymaha la codsaday, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa ogeysiin doona maxkamadda deegaanka ee lagu eedeeyay inay dhacdadu ka dhacday in dacwad lagu soo oogay. Dhammaan tafaasiisha khuseeya cabashada waxa lagu dari doonaa ogeysiiska. Fadlan ogsoonow in dhammaan cabashooyinka la xiriira shaqaalaha Xafiiska Fudeydinta Luqadda ama qandaraaslaha in lagu xallin doono iyada oo la adeegsanayo nidaamka anshaxa shaqaalaha ee Xafiiska Maamulka ee Kentucky.

**5. Baaritaanka Cabashada.** Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa ku bilaabi doona baadhista eedaymaha lagu xusay cabashada muddo 10 maalmood oo shaqo gudahooda kadib marka la ogeysiiyo maxkamada deegaanka helitaanka cabashada. Inkasta oo hanaanka baadhistu uu kala duwanaan doono iyadoo lagu saleynayo tafaasiisha cabasho kasta, waxyaabaha ay suurtogalka tahay in la sameeyo waxaa ka mid ah wareysiga qofka/dadka ay khusayso cabashadu, oo ay ku jiraan garsoorayaasha, karraaniyada iyo turjumaanadu, iyo qorista bayaanada qoraalka ah ee dhammaan macluumaadka la ururiyay intii lagu jiray hawsha wareysiga.

**6. Xallinta Cabashada.** Baaritaanka kadib, Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa xal u soo jeedin doona maxkamadda ay khusayso si wax looga qabato eedeymaha cabashada, amaba kula tallin doonta maxkamadda in cabashadu aysan sal iyo raad lahayn. Maxkamadda waxaa looga baahan doonaa inay u gudbiso warbixinta horumarka Xafiiska Fudeydinta Luqadda muddo 10 maalmood oo shaqo gudahood ah kadib marka la helo xalka la soo jeediyay. Ku guuldaraysiga ay maxkamaddu ku guuldaraysato inay u hoggaansanto hanaanka cabashada ama ay ku hirgeliso xal aan dib dhicin waxay keeni kartaa in dacwad rasmi ah loo gudbiyo Guddida Anshaxa Garsoorka.

**7. Ogeysiinta Qofka Soo Cawday.** Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa ogeysiin doona qofka cabashada soo gudbiyay 10 maalmood oo shaqo gudahood ka dib marka uu helo warbixinta horumarka si uu ugu faahfaahiyo tallaabooyinka ay fulinayso maxkamadda deegaanka si ay u xalliso cabashada.

**8. Xogta iyo Helitaanka Dadweynaha.** Xafiiska Fudeydinta Luqadda ayaa hayn doona keydka xogta cabashooyinka iyo tallaabooyinka la qaaday si loo xalliyo, waana in uu u soo bandhigaa dadweynaha marka la codsado.

**9. Mamnuucida Aargoosiga.** "Waa ka mamnuuc qofka qaata adeega ama qof kaleba inuu cabsi geliyo, u hanjabo, qasbo, ama takooro shakhsi kale iyadoo ujeeddadu tahay inuu farageliyo xuquuq kasta ama mudnaan kasta oo ay siisay [Title VI], ama maadaama uu gudbiyay cabasho, marag kacay, gacn ka geystay, ama si uun uga qeybqaatay baadhis, dacwad ama dhageysi sida ay dhigayso qeyb-hoosaadkani." 28 C.F.R. § 42.108 (e)